# Sharciga nolol maalmeedka

Warqadahaan waxaasoo saaray iskaashiga u dhaxeeya hay'adda isuduwidda qaxootiga Genevaiyo Rugta Sharci dejinta ee jaamacadda Geneva. Waxay ku wajahan yihiin caruurta aan qaan gaarin iyo kuwa qaan gaarka ah ee aan lala socon oo ku nool Geneva. Waxay uyeedadooda tahay in ay ku wargeliyaan sida ugu fudud xuquuqaha qaarkood ay ku leeyihiin bulshada dhexdeeda. Wixii macluumaad dheeraad ah iyo faahfaahin , waxaad kala socon kartaa buug-yaraha ku yaal xuquuqda loo dajiyay dhallinyarada muhaajiriinta aan lala socon ee Rugta Sharciga.

**Mabaadi'da**

Haddii aad tahay qof aan qaan gaarin, waxaad guud ahaan u baahan tahay daryeelid ku saabsan hab socodka sharciga iyo maamulka.

Waxaad yeelaneysaa qof masuuliyadaada la wareegaya guud ahaan.Tusaale ahaan :- akoon bangi inaad furato , inaad kireysato guri , inaad soo iibsato telefoon, i.w.m. ah, waxaad u baahan tahay ogolaanshaha wakiilkaaga (lab/dheddig)-( assistant-e ).

Uma baahnid ogolaanshaha wakiilkaaga sharci nolol maalmeedkaaga, tusaale ahaan in aad iibsato cunto, dhar ama shay kale. Waxaad sidoo kale ku biiri kartaa naadiga isboortiga ama maktabadda haddii aad buuxiso shuruudaha lagaa doonayo.

Haddii aad tahay qof weyn, kaligaa ayaa is maamuli kara. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato in aad tusiso dukumeenti, aqoonsi ama ogolaanshaha joogitaanka. Labadaas aqoonsi haddii aadan haysan way adag tahay. Haddii aad haysato "Waraaqda cad" keliya, aqoonsi buuxa ma haysatid tusaale ahaan.

**Akoon furasho**

Si aad akoon uga furato Swiss Post (PostFinance) ama bangiga, waa inaad keeni kartaa caddayntaada aqoonsiga (tusaale ahaan baasaaboor ama sharci joogitaan oo sax ah). Boostada ama bangigu, sabab la'aan ayay kuugu diidi karaan in ay akoon magacaaga ku furaan , xaaladdan oo kale waxaad had iyo jeer la tashan kartaa xafiisyada Joogteynta bulsheed ee sharciga ah, tusaale (caritas ),waxayna kuu helayaan xal, mararka qaarkood.

**ibsasho (ama gadasho) shay**

Markaad wax gadato, sharciga Swiska wuxuu u arkaa inaad "heshiis" la gashay iibiyaha.
"Heshiiskaas" waxa uu kugu qasbayaa in aad lacag dhaafsato shayga, laakiin wuxuu kugu badbaadin karaa haddii ay wax qaldamaan.

Iibka qaar ka mid ah (tusaale: telefoonka gacanta), waxaad yeelan kartaa dammaanad, shaqaynaysa hal ama laba sano. Xaaladdan oo kale, aad bay muhiim u tahay in aad hayso ama xafido caddaynta iibsashadaada iyo shuruudaha guud ee iibka haddii aad heshay.

# Sharciga nolol maalmeedka

**Ka Iibso shayga onlayn**

Haddii aad shay ka iibsato internetka xataa hal gujin, waxaad gelaysaa heshiis ama qandaraas (contrat). Taas macneheedu waxa weeye in aad ku qasban tahay bixinta qiimaha iyo qaansheegyada ama biilasha (factures) haddii ay tahay is-diiwaangelin.

**Heshiis qandaraas (contrat)**

Heshiis aad saxiixday ayaa ku xiraya, markaas waxaad mas'uul ka noqon doontaa qaansheegyada ku xiran heshiiskan, xataa haddii aadan ka faa’iideysan adeegyada ama haddii aadan si sax ah u fahmin.
Si aad u ogaato xuquuqdaada, akhri qoraallada oo ku xusan (shuruudaha guud ee iibka) (SGI)=(CGV)
Burinta ama ka bixinta qandaraaska waxaa loo samayn karaa qoraal ahaan, mabda'ahaan (warqad oo diiwaangashan)- (recommadè) oo boostada lagu soo diro maalmaha ka dambeeya dhamaadka heshiiska. Wakhtiga kama dambaysta ahi wuu kala duwan yahay, iyadoo loo eegayo heshiiska aad saxiixday. Way ka sii adag tahay shuruudaha jebinta qandaraaska oo faahfaahintooda laga heli kara shuruudaha guud ee iibka ( SGI ) = (CGV).

**DAWAGALKA BIILASHA ama qaansheegyada (Poursuites)**

Dawagalka biilasha, bixin la’aanta biilasha (ADB), waa biilal aadan weli bixinin. Waxay ku diiwaan gashan yihiin diiwaanka dabagalka biilasha ugu yaraan ilaa 20 sano. Waxay cawaaqib weyn ku yeelan karaan noloshaada Switzerland, tusaale ahaan: - beddelidda sharciga aad ku joogtid, in aad kireysatid guri , in aad raadsato shaqo ,iwm. ah. Waxaad aad dacwad ka heli doontaa dhanka amar bixinta dabagalka biilasha .Waxaad gabi ahaan ama qayb ahaan ka soo horjeedsan kartaa haddii aad horay u bixisay qaansheegta ama qayb ka mid ah qaansheegta ama haddii aanay ku khusayn. Haddii aanay taasi arintu ahayn, xafiiska dabagalka biilasha ayaa si toos ah uga qaadan kara qayb ka mid ah mushaharkaaga si uu u bixiyo waxa lagugu leeyahay. Haddii hantidaada ay yar tahay, markaa waxaad heli doontaa " shahaado la’aanta hantida.(acte de défaut de biens)
Qaansheegyada oo waqtigooda lagu bixinin oo hantidhoor ah ayaa sidoo kale loo gudbin karaa shirkad aruurisa oo hantidhoor ah (Inkasso, Debitors, EOS, Intrum, iwm.ah). Shirkadahani waxay kuu soo diri doonaan qaansheegyo cusub oo la xiriira kuwa aadan bixinin, oo leh kharashyo dheeri ah, oo inta badan si sharci darro ah loogu soo daray. Waa adiga oo la socda shirkadahan, waana la doodi kartaa bixinta biilka.

# Sharciga nolol maalmeedka

**Talooyin muhiim ah**

Had iyo jeer weydii ama iska hubi ka hor intaadan ka iibsan shay dukaanka ama internetka! Inta aadan saxiixin heshiis, weydiiso waqti aad ka soo fikirto. Iibiyuhu waa inuu ku siiyaa heshiiska iyo shuruudaha guud ee iibka si aad u daawato. Waxaad awoodaa sidoo kale in aad weydiiso ra'yi ama la tashi qof aad ku kalsoon tahay.
Haddii alaabta aad soo iibsatay ay cillad leedahay ama haddii ay si fiican u shaqayn waydo oo aad garato iibsashada ka dib, waxaad haysataa saddex ikhtiyaar:- codso joojinta iibka, codso dhimista iibka qiimaha ama lacag celinta ama codso beddelka shayga la iibsaday.

Talo:- hayso caddaynta iibsashadaada (tigidh, qandaraas). Waxaa loo isticmaali karaa soo celinta ama in lagu codsado damaanad.(garantie).

Fadlan ka digtoonow:- haddii dukaanku aqbalo soo celinta, tani macnaheedu ma ahan inuu lacagta kuu soo celin doono. Dukaamada waxa laga yaabaa in ay bixiyaan boonooyin qiimaha alaabta. Haddii lacagta la soo celin waayo aan lagu siin shuruudaha iibka, waa inaad ku qanacdaa boonada.

Markaad saxiixdo heshiis, ogow ama iska hubi shuruudaha dib u cusboonaysiinta heshiiskaaga (mararka qaarkood si toos ah)(automatique) iyo shuruudaha joojinta. Waxaad ka fogaan doontaa kedinta (surprises).
Ka digtoonow websaydada ballan-qaadyo badan kuu sameeya, inta badan waa khiyaano. Tusaale ahaan, websaydada oo kuu sheegaya inay kaa caawin doonaan inaad hesho guri marka aad lacag bixiso. Badanaa waa mid aad qaali u ah oo aan waxtar lahayn.

Hawl-wadeennada telefoonada waxay bixiyaan qandaraasyo ka saaraya adeegyada qaarkood (tusaale ahaan, wicitaannada dibadda). Ka hor intaadan saxiixin heshiiska, qor liiska baahidaada oo weydii hawlwadeenka su'aalo. Haddii aadan ka helin jawaabo ku qancin kara, ka digtoonow oo weydii shuruudaha guud ee iibinta dalabka la soo jeediyay ka hor inta aadan xambaarsan mas'uulkaas.

Haddii aad qabto dhibaato dhaqaale ama dawagal qaansheegto (poursuites) ama biilasha shirkad ururinta (recouvrement), adiga waxaad caawinaad ka raadsan kartaa adeegyada la aqoonsan yahay ee ku takhasusay daaweynta deynta (tusaale ahaan CSPda ama Caritaska). Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa adeegga bulshada (service sociale) oo kaa caawin kara inaad caddeyso xaaladahaada iyo xal u helidooda.

# Sharciga nolol maalmeedka

**Cinwaanyo wax-tar leh**

www.coupdepoucemajeur.ch

www.ciao.ch

Fédération romande des consommateurs (FRC) : www.frc.ch

Bon à savoir : www.bonasavoir.ch